



## WARQADA XAQIQDA

### WAXKA BEDELIDA CODE-KA DEMBIGA (GOOGOYNTA FERJIGA DUMARKA (GUDNIINKA)) EE SHARCIGA 2013

#### Sharcigii hore

Hadda ka hor, sida waafaqsan qaybta 186C ee Code ka Dembiga, waxay ahayd dembi in qofi ka kaxeeyo ilmo Northern Territory, ama uu sameeyo qabanqaabo sidaas ah, iyadoo qasadku yahay fulinta googeynta ferjiga dumarka. Si kastaba ha ahaatee, ma ahayn dembi in la qabanqaabiyo ka ka xeynta qof dumar ah oo weyn Northern Territory oo isla ujeedadaas.

#### Muxuu sameynayaa Sharciga cusub?

*Bedelaada Code ka – Dembiga (Googeynta Ferjiga Dumarka) ee Sharciga 2013 oo bilaabmay 4-tii Diiseembar 2013.*

Sharcigu wuxuu bedelayaa qaybta 186C ee Code ka Dembiyada si uu u waafaqo labadaba carruurta iyo dumarka waaweyn. Tan micnaheedu waxaa weeye hadda waa dembi in qofi ka kaxeeyo qof dumar ah ilmo ama qof weyn Northern Territory, ama uu sameeyo qabanqaabo inuu sidaas sameeyo, iyadoo ujeedadu tahay fulinta googoynta ferjiga dumarka.

Ma aha ujeedada sharciga in la ciqaabo ama la dacweeyo dhibanaha. Natiijo ahaan, xitaa haddii ay raali ka ahaato in laga kaxeeyo Northern Territory, dembigaas laguma qaadi doono. Ujeedada dembiga waxaa weeyaan oo kaliya in la ciqaabo ficilka dadka kale ee ka kaxeeya ama qabanqaabiya inay ka kaxeeyaan dumarka Northern Territory, oo ujeedadu tahay fulinta googeynta ferjiga dumarka.

#### Waa maxay sababta sharcigu isubedelay?

Maarso 2013 warbixinta qaranka ee loogu yeero dib u eegista Qaabka Googeynta Ferjiga Dumarka Australiya ayaa la daabacay. Warbixintu waxay sameysay tiro tallo soo jeedino ah si loo hubiyo ka ilaalinta ugu badan ee dumarka iyo carruurta googaynta Ferjiga dumarka. Abriil 2013 Northern Territory waxay isku raacday inay qaado tallaabooyin lagu dhaqangelinayo tallooyinka warbixintaan. Sharciga Northern Territory hadda wuxuu siiyey ilaalin waafaqsan badiba tallooyinkii warbixinta, si kastaba ha ahaatee, ka ilaalinta qofka in loo kaxeeyo gobol kale ama dal iyadoo ujeedadu tahay in lagu sameeyo googeynta ferjiga dumarka wuxuu ku xaddidnaa carruurta mana dabooleynin dumarka waa weyn. Wax sabab ahina ma jirin in lagu xaddido dembiga ka xeynta carruurta ayaa la ogaaday.

Natiijo ahaan, Code ka dembiga waa la bedelay si loo hubiyo in labadaba dumarka waa weyn iyo carruurta laga ilaaliyo u kaxeeynta gobol kale ama dal iyadoo ujeedadu tahay fulinta googeynta ferjiga dumarka (Gudniinka).

## **Ciqaab**

Haddii qof ka kaxeeyo dumar, haddii ay tahay qof weyn ama carruur, Northern Territory, ama uu sameeyo qabanqaabo inuu sidaas sameeyo , iyadoo ujeedadiisu tahay fulinta googeynta ferjiga dumarka, waxay gelayaan dembi , qofka ka dib waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ugu badan oo dhan 14 sanno oo xabsi ah.

## **Goorma ayaa sharciga cusub dhaqangelayaa?**

Qofkii ka kaxeeya qof dumar ah Northern Territory, ama sameeya qabanqaabo inuu sidaas sameeyo, iyadoo ujeedadiisu tahay fulinta googeynta ferjiga dumarka laga bilaabo 4 Diiseembar 2013 wuxuu gelayaa dembi. Si kastaba ha ahaatee, haddii dembigu dhacay ka hor 4 diiseembar 2013, ka dib dembiilaha uun baa la dacweynayaa haddii ay ka kaxeyeen ilmo Northern Territory iyadoo ujeedadu tahay fulinta googeynta ferjiga dumarka.